Suaalaha Inta Badan Layswaydiiyo (FAQs)

Shaxda Hormarka uu Sameeyay Dugsiga Washington Schol (WSIF)
iyo Sharciga Guusha Arday Kasta (ESSA)

Aasaaska

- Waa maxay Sharciga Guusha Arday Kasta (ESSA)? Maxaan ubaahanahay inaan ka ogaado sharcigaan?

ESSA waa sharci culus oo heer federal ah kaasoo lagu maamulo waxbarashada dawlada ee dalka Maraykanka. Gaar ahaan, ESSA waa dib udhaqan galinta Sharciga Waxabarashada Dugsiga Hoose iyo kan Sare (ESEA) kaasoo uu dhaqan galiyay Madaxwayne Obama bishii Diseembar 10, 2015. Sharcigii 2002 ee ESSA kahoreeyay waxaa looyaqaanay inta badan Sharciga No Child Left Behind wuxuuna bixinaayay talaabooyin lagu ogaanaayo daldaloolada kajira waxbarashada bulshooyinka dhaqan ahaan adeegyada kufilan aan lasiinin. ESS wuxuu siiwadayaa inuu hrmariyo sinaanta wuxuuna qasab kadhigayaa in dhamaan ardayda waxbarasho heer sare ah labaro taasoo udiyaarinaysa heer ay kubiiraan kuleejyada barashada xirfadaha.

Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan ESSA, fadlan kafiiri Xafiiska kormeeraha guud ee waxbarashada dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction) (OSPI) ama the US Department of Education.

- Maxaan muhiimad usiinayaa inaan waxka ogaado sharciga ESSA?

Dib udhaqangalinta sharciga dawlada federalku maaha mid jogto ah waxayna taasi gobalka Washington siinaysaa fursad gaar ah oo uu kucusboonaysiinaayo nidaamka waxbarashada si kor lg qaado natiijada ay gaaraan ardaydu. Hase yeeshee, shaqada udiyaarinta ardayda wadada guusha kadib markay qalin jabiyaan waa midka ay OSPI lawadaagayso ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada. Si aad ufahanto aadna qayb uga noqoto qorshayaasha OSPI si lootaageero degmooyinka iyo dugsiyada, waxaa dib u akhrin kartaa qorshaha ESSA Consolidated Plan.

Aqoonsiga

- Waa maxay Shaxda Hormarinta Dugsiga Washington Schol (WSIF) ? Sidee ayaa dugsiyadaada loo aqonsadaa? Waa maxay "natiijada kooban?"

Gobalka Washington ayaa abuuray WSIF, kaasoo adeegsada iskudarka cabirada aqoonta (tusaale, Farshaxanka Barashada Ingiriisiga aqoonta Xisaabta iyo kobaca, qalin jabinta, iyo hormarka ay sameeyaan ardayda dhigata Ingiriisiga) ayna lasocdaan cabirada tayada dugsiga iyo guusha ardayda (tusaale, xaadirida joogtada ah, ardayda fasalka 9**aad** ee udiyaar garoobaaya qalin jabinta iyo qaadashada koorssoyinka dheeraadka ah/labada shahaado). Cabiradaan waxaa lagu daraa buundada ardaygu keeno kuwaasoo markaas loo adeegsado in lag aqoonsado Hormarka dugsiga ama taageerooyinka uu Ubaahanyahay.

Suaalaha Inta Badan Nalawaydiiyo oo Bulshada Kayimaada

- Dugsiyada loo arko inay taageerooyin Hormarineed ubaahan yihiin waa kuwa dadaalkooda guud ee dhamaan ardaydooda uu kudhaco 5% ee ugu hoosaysa dugsiyada gobalka Washington
- Dugsiga loo arko inay ubaahanyihiin Taageerooyinka Kobaca ee Buundada Qalin jabinta waa dugsiyada afar jeer ardaygu kaqali jabisay ayagoo wada buundo kayar 67%
- Dugsiyada lasiinaayo Taageerooyinka hadaf gaarida waa dugsiyada dadaalkooda guud uu kakoreeyo cabirka 5%, laakiin ay dhigtaan koox gaar ah oo arday buundooyinkoodu hooseeyaan.

Aqoonsiga sanadka 2018, cabirka 5% waa buundo udhiganta ama kahoosaysa 2.3. Taasoo macnaheedu yahay in dugsiga Taageerooyinka kbaca ubaahan ay haystaan buundo udhiganta ama kahoosaysa 2.3, halka dugsiyada ubaahan taageerada Hadaf gaaridu ay leeyihiin qaar ardaydooda kamid ah ay haystaa buundooyin udhigma ama kahooseeya 2.3.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo laxariira qaabka waxaa laga daalacan karaa Washington ESSA Consolidated Plan.

- Maxay kadhigantahay in dugsigayga loo aqoonsado (Mid ubaahan taageero dhanka Kobaca, Kor uqaadista Darajada Qalin jabinta, Taageerada lasiiyo Arday gaar ah)?

Hadii dugsiga loo aqoonsado inuu yahay Mid ubaahan taageero dhanka Kobaca ama Taageerada lasiiyo Arday gaar ah midkood, waxay kadhigantahay in dugsigu ubaahan yahay meelo gaar ah inuu hormar kasameeyo. Shaqadaan waxaa looyawaanaa hormarinta dugsiga. Meelaha uu dugsigu ubaahanyahay inuu kobaca kasameeyo waxay noqon karaan kuwo cabir gaar ah leh, sida qalinjabinta ama dadaalka guud ee ay sameeyaan koox gaar ah oo ardayda kamid ah, sida ardayda naafada ah. Waagii hore, in dugsiga loo arko mid ubaahan hormarin waxay ahayd mid looqaato natiijo xun, laakiin OSPI waxay doonaysaa inay badasho fikirka noocaas ah. Dugsiyada dawladu waxay waxbaraan dhamaan ardayda dugsigda dhigta, laakiin arday dugsiyada qaar ayaa qaba baahiyo kabadan kuwa ardayda kale. Waxaan aaminsanahay inaan diirada saarno buuxinta dhamaan baahiyaha ardayda taasoo macanheedu yahay inaan aqoonsano dugsiyada baahida dheeriga ah uqaba in arintaas laga caawiyo.

- Maxay kadhigantahay in dugsigayga uusan dadaal fiican lahayn sababo lxariira in loo aqoonsaday mid hormarin ubaahan?

OSPI waxay aaminsantahay in markasta hormarin loobaahanyahay. Dugsiyo badan ayaa loo arkaa inay guul gaareen marka laga fiirisho cabiro badan, laakiin wali dadaal dheeri ah saaraaya siday usii hagaajin lahaayeen waxay kaguul keeneen. Dugsiyada qaar waxay ahaan karaan shaqo badan oo samaynayaan, laakiin wali waxay kashaqaynayaan inay sii hormariyaan dugsigooda. Inta WSIF ay baarayso dadaalka dugsiyada ayadoo raacaysa talaabooyin muhiim ah, waxaa muhiim ah in laxasuusnaado inay jiraan astaamo badan oo naga caawinaaya go'aaminta in dugsigu uu "dadaal fiican hayo."

Suaalaha Inta Badan Nalawaydiiyo oo Bulshada Kayimaada

Waagii hore, in dugsiga loo arko mid ubaahan hormarin waxay ahayd mid looqaato natiijo xun, laakiin OSPI waxay doonaysaa inay badasho fikirka noocaas ah. Dugsiyada dawladu waxay waxbaraan dhamaan ardayda dugsigda dhigta, laakiin arday dugsiyada qaar ayaa qaba baahiyo kabadan kuwa ardayda kale. Waxaan aaminsanahay inaan diirada saarno buuxinta dhamaan baahiyaha ardayda taasoo macanheedu yahay inaan aqoonsano dugsiyada baahida dheeriga ah uqaba in arintaas laga caawiyo.

- Waxaan maqlay in dugsiyo badan la aqoonsaday - cabirka cusub ee qiimaynta tayadu maka adagyahay kii hore?

WSIF kama adka kii hore, laakiin wuu kaduwanyahay. Sabab laxariirta dadaalka Washington kubixinayso waxbarasho loosimanyahay, qaabka shaxda qiimaynta ee ESSA waxbaa iskabadalay si loosii hagaajiyo aqoonsiga meelaha ay tahay inaan hormarka kasamayno si aan ugaarno yoolkeena oo ah in arday kasta oo Washington kunool loodiyaarsho siduu guul uga gaari lahaa xirfadiisa shaqo, kuleejka, iyo noloshaba.

Ayadoo ay xaqiiqo tahay in dugsiyo badan loo arkaayo inay ubahanyihiin hormarin dheeraad ah in kabadan sidii waayihii hore, OSPI waxay arintaan u aragtaa mid wanaagsan waayo waxay muujinaysaa xajmiga shaqo ee ubaahan in laqabto si loo xaqiijiyo in arday kasta uu helo aqoonta uu ubaahanyahay si uu ugu guulaysto noloshiisa dugsiga kadib.

- Maxaa dugsiyo badan loogu asteeyay kuwo ubaahan inay Kobac kasameeyaan Rajada fasalada ee xarumaha waxbarahsada dheeraadka ah?

Hal talaabo hormarineed o OSPI ay samaynayso ayaa ah taageero kaladuwan oo lasiinaayo degmooyinka iyo dugsiyada ayadoo laga raacaayo baahiyaha uu midkasta qabo. Maadaama aan aqoonsanayno dugsiyada ubaahan taageerada dheeriga ah, waxaan aaminsanahay in aqoonsiga dugsiyada kuwaas badalka u ah waa muhiim waayo goobahaan waxay u adeegaan ardayda ubaahan taageeroyinka kaladuwan.

Arinta labaad, waxaan eegaynaa cabirada kale ee waxgalka ah oo naga caawin kara (tusaale, OSPI, degmada, iyo dugsiga) qiimaynta barnaamijka iyo qorshaynta hormarinta. Tusaale ahaan, buundooyinka qalinjabinta waxaa lagu cabiraa ayadoo laxisaabinaayo buundooyinka qalin jabinada mudo afar sano ah arday badan ayaana kaqalin jabisa dugsiyada badalka ah laakiin mara jadwalka dheeriga ah ee qalin jabinta.

- Sidee ayay arintaan uga duwantahay/ulamid tahay cabiradaa Muhimad siinta ama Diirad saarida? Dugsiyadu ma ubaahanyihinn inay sameeyaan Hormar Muuqda Snadkasta (AYP)?

Marka laga hadlaayo barnaamijka No Child Left Behind, dugsiyada waxaa loo aqoonsadaa kuwo hormarin ubaahan ayadoo loo asteeyo kuwo Muhiim lasiinaayo ama Diirada lasaaraayo si loogu aqoonsado kuwo kobac samaynaayo waa inay sameeyaan kobac muuqda sanadkiiba. Maadaama aan si buuxda udiiwaangalinay yoolkeena, waxaa jira dhawr meelood oo ay iska shabahaan. Dugsiyada Kobaca Ubaahn iyo kuwa Kobaca gaarka ah ubaahan waxay lamid yihn kuwa Diirada lasaaraayo sababtoo ah labaduba waxay kuwada jiraan qayb kucad heer gobal iyo heer federal ba. Wixii intaas kadanbeeya, fulinta ESSA iyo maamulka

cusub ee uu hogaaminaayo Maamulaha Guud Reykdal ayaa bilaabaaya qaab cusub oo lagu aqoonsanaayo guulaha dugsiyada. Waxaan kaguuraynaa talaabada ganaaxa ee "fashilka" dugsiyada, anagoo taas badalkeed siinayna dugsiyada taageero gaar ah kuwaaso baahi wayn uqaba taas.

Cabirada isla xisaabtanka ayaga waa isbadaleen sidoo kale, ayadoo lafiirnaayo wax kabadan buundooyinka qalinjabinta iyo natiijoyinka guulaha ardayga si loogo'aansho in dugsigu ubaahanyahay inuu meelo gaar ah hormarin kasameeyo. Nidaamka cusub ee WSIF wuxuu balaarinayaa cabirada ayadoo lagusoo daraayo kobaca, hormarka barashada af Ingiriisiga, xaadirida joogta ah ee fasalada, iyo, haday kuaboonaato, cabirada udiyaar garoowga barashada xirfadaha iyo kuleejka, sida koorsada dheeraadka ah (labada shahaado) ee labixiyo iyo ardayda fasalka 9aad ugudbaaya ee qalinjabinaaya. Dugsiyada laga dooni maayo inay sameeyaan Kbac Muuqda Sanad kasta sida kucad nidaamka No Child Left Behind laakiin waa inay kobac usameeyaan sida kuqeexan qorshayaashoda hormarinta.

- Hadaan ahayn xubin amid ah bulshada/waalidka xagee ayaan kahelayaa macluumaad dheeri ah oo kusaabsan degmadayda iyo dugsigayga?

Waxaa jira dhawr meelood oo xubnaha bulshada iyo qoysku kaheli karaan macluumaad kusaabsan degmadooda iyo dugsigooda. Qaybta koobaad ee macluumaadka waxaa si toos ah lookeenayaa dugsiga iyo degmadaada! Meel kale ood kaheli karto maclumaadka waxay sido kale noqon kartaa boorarka dugsiga.

Si aad uhesho macluumaad dheeri ah oo laxariira dadaalka dugsiaaga, booqo bogga Report Card, oo ay maamusho waaxda waxbarashada ee gobalka, OSPI.

Taageerooyinka

- Ano ah xubin kamid ah bulshada/waalid/xubin qyska kamid ah sidee ayaa kutaageeri karaa dugsigayga?

Dugsiga deegaankaaga ayaa kuusheegaaya sida ugu ffican ee aad gacan kusiin karto dugsigaaga. Fadlan fiiri ebssetka dugsigaaga si, boooda baraha bulshada, ama wac dugsigaaga degaankasi aad u ogaato marka xigta ee lala kulmaayo waalidka/qoyska. Waxaad sidoo kale suaalo kawaydiin kartaa inaad tabarucaad ama sadaq kubixiso dugsigaaga.

Caadiyan doorka ugu muhiimsan waa inaad taageerto caruurta aad gacanta kuhaysto. Kutababaro barashada labada dhan ee waxbarashada (tusaale, wax isla akhrinta) ama baashaalka (sida barashada sida lookariyo cuntada). Xaqiiji in caruurtu dugsiga timaado ayagoo diyaar u ah inay wax akhristaan (tusaale, xaqiiji inay helaan nasiino kufilan, kana taageer inay si joogto ah dugsiga uxaadiraan ayna kujirto inay waqtiga saxda ah dugsiga yimaadaan). Wax kaaydii caruurta dugsiga adoo waydiinaayo suaalo daahfurnaan leh si aad ugu dhiiri galiso inay hadlaan (tusaale, "Maxaa cusub ood maanta soobaratay?" hana waydiin suaalaha haa/maya sida "Maanta iskuulku mafiicnaa?"). Kalahadal caruur rajooyinkooda iyo riyooyinkooda mustaqbalka una sheeg riyooyinkaaga iyo rajoyinkaaga.

Suaalaha Inta Badan Nalawaydiiyo oo Bulshada Kayimaada

- Maxay yihiin warbixinada ama xariirada kale ee aan kafilanaayo degmada ama dugsiga?

Macluumaadka iyo xariirada aad layeelanayso demada iyo dugsiga deegaanka waxay kuxirantahay meeshay kuyaalaan. Hase yeeshee, dugsiyadu waxay kulasoo wadaagayaa macluumaadyo muhiim ah sida darajada cunugaaga kakeenay qiimaynada gobalka oo dhan, macluumaadka kusaabsan kaarka warbixinta ee dugsiga, iyo xaalada kobaca dugsiga. Waalidiinta iyo xubnaha qoyska waxay sidoo kale kalashaqaynayaan shaqaalaha dugsiga dajinta naqshada hormarinta dgsiga. Dugsiyada qaar ayaa leh macluumaad gaar ah oo laga doonaayo inay usheegaan waalidiinta iyo qoysaska haday lakulmaan shuruudaha dawlada federalka ah qaarkood.